

SHARCI LAM 54W

NADAXWEYNAHA JAMHUURIYADA SOMALILAND

MARKUU ARKAY:- Axdiga Qaranka Qodobkiisa 17aad; Xubintiisa 2aad; Karafka (B) oo ka hadlaya xilka xukuumadda ka saaran hirgelinta Nabadgelyada iyo ammaanka Gudaha iyo ka difaaca dalka Weerarada shisheeye.

MARKUU ARKAY:- Axdiga Qaranka Qodobkiisa 17aad; Xubintiisa 3 aad; Karafka (R) oo tilmaamaya xilka xukuumadda ka saaran abuurista Ciidan Nabadgelo iyo jahaynta Maliishiyada;

MARKUU DERSAY:- Axdiga Nabadgelyada ee Beelaha S/Land Qodobkiisa 9aad; xubintiisa 2aad oo ka hadlaya in Gobol walba samaysto Ciidan Boliis oo saldhig u noqon kara Boliiska Qaranka;

MARKUU EEGAY:- Axdiga Qaranka Qodobkiisa 14aad; xubintiisa 7aad; oo tilmaamaya in Madaxweynahu yahay Taliyaha Guud ee Ciidamada Qaranka;

MARKUU KA BAARAAN DEGAY:- Qod. 21aad ee Axdiga Qaranka; oo tilmaamaya Mabda'a baahinta Maamulka ee Goboladda iyo degmooyinka Dalka

MARKUU DHEGEYSTAY:- Soo jeedintii Wasiirka Arrimaha Gudaha

MARKUU TIXGELIYEY:- Guddoonka Golaha Wasiirada

wuxuu soo saaray sharcigan soo socda:  
Qodobka 1aad (Dhismaha)

1. Si waafaqsan sharciga waxaa la ogolaaday Dhismaha Ciidanka Boliiska Jamhuuriyadda S/Land oo hoos yimaada wasaaradda Arrimaha Gudaha; kana kooban:-

B) Ciidanka Boliiska heer Qaran  
T) iyo Ciidanka Boliiska heer deegnan.

2. Ciidanka Boliiska heer qaran wuxuu ka koobanayaa:

- B) Laanta Baadhista Dembiyada (CID)
- T) Laanta Socdaalka (Immigration)
- J) Laanta Ururiinta wararka ee Saarka (Intelligence)
- X) Ciidanka Birmadka (Emergency Force)
- Kh) Qaybaha.

3. Ciidanka Boliiska heer Deegaan waa Saldhigade  
Degmooyinka

4. Fadhiga Taliska Guud ee Ciidanka waa Caasimadda JSL.

#### QODOBKA 2aad (Hoggaaminta)

1. Hoggaaminta sare ee Ciidanka waa:-

- B) Taliyaha Ciidanka Boliiska iyo
- T) Taliye ku xigeenka Ciidanka Boliiska.

2. Taliyaha Ciidanka Boliiska waxa lagu macabayaa Xeer Madaxweyne iyadoo uu soo jeediyey Wasiirka arrimaha Guduhu.

3. Taliye Xigeenka Ciidanka Boliiska waxaa lagu Magacaabayaa Xeer-Madaxweyne iyadoo uu sidaas soo jeediyey Wasiirka Arrimaha Gudaha oo la tashaday Taliyaha Ciidanka Boliiska.

#### Qodobka 3aad (Ciidanka)

Ciidanka waxaa lagu aasaasayaa xubno laga xushay Muwaadiniinta S/Land ee kala ah:-

- B) Mujaahidiinta & Muwaadiniinta
- T) Dadka aqoonta u leh Cilmiga Boliiska
- J) Aqoonyahanka.

#### Qodobka 4aad (Jaangooynta Ciidanka)

Soo jeedinta tirada Ciidanka Boliiska ee heer qaran iyo heer deegaan waxa iska leh wasiirka Arrimaha Gudaha waxaana u ogolaanaya Golaha Wasiirada.

#### Qodobka 5aad (Xilka iyo Waajibka)

1. Ka sakow waajibaadka ay saarayaan Shuruucda Dalka, xilka Ciidanka Boliisku waa ilaalinta iyo sugidda Nabadgelyada Jamhuuriyadda S/Land,

2. Ciidanka Boliiska deegaanka waxaa xilkiisa u dheer ilaalinta cashuuraha Dawladaha Hoose.

#### Qodobka 6aad.

Ciidanka Boliiska Deegaanku wuxuu hoos tegayaa daga Magaalada ee Degmo kasta. Deegaan waliba wuxuu masu'ul ka yahay Taakuleynta Boliiskiisa

#### Qodobka 7aad (Baaxadda Awoodda)

1. Ciidanka Boliiska heer qaran wuxuu ka hawl geli karaa dhamaan xadka JSL.

3.

2. Ciidanka Boliiska heer Deegaan wuxuu ka hawlgeli karaa xadka degmadiisa, xaaladaha uu xeer-nidaamiyuhu tilmaami doono mooyaane.

QODOBKA 8aad. (Xeer nidaamiye)

1. Qaabdhismeedka iyo arrimaha Ciidanka waxa lagu soo saarayaa Xeer nidaamiye uu soo jeediyo Wasiirka Arrimaha Gudaha.

2. Xeer nidaamiyaha waxa ogolaansho looga rabaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland isagoo la tashaday Golaha Wasiirada.

Qodobka 9aad (Qaabka wada shaqaynta)

Qaabka wada shaqaynta Ciidanka Boliiska heer qaran iyo deegaan waxaa lagu tilmaamayaa Xeer-nidaamiyaha.

Qodobka 10aad (baabi'iinta Sharci)

Waxaa la baabi'yey Xeer kasta oo ka soo horjeeda qaab-dhismeedka Ciidanka, sidoo kale Qodob kasta oo aan la socon karin Xeerkan ee xeer kasta.

Qodobka 11aad (Dhaqangal)

Xeerkani wuxuu dhaqangelyaa maalinta ku xigta baahintiisa laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee JSL.

3<sup>rd</sup> November, 1994

Maxamad Ibraahim Cigaal)  
MADAXWEYNAHA JSL.